https://t.me/Somalilibrary

UJEEDO

Waxaan halkaan idin kusoo gudbinayaa muhiimada iyo nuxurka buuga taangigii tigreega ee uu qoray allaha unaxaristo qoraa Cabdilqaadir Aroma, waxaan jecleestay si aan akhriska u dhiirigaliyo in si kooban nuxurka buuga iyo muhiiimada uu u leeyahay bulshada soomaliyeed inaan halkan idin kula wadaago, waxaan rajeynayaa inaad ku dhiiratid inaad buuga oo dhamaystiran akhrisid.

Buuga Taangigii Tigreega waxa uu ka koobanyahay 5 cutub oo kala ah;-

Cutubka 1aad: Qaran mise qabiil

Cutubka 2aad: Xudunta xasaradda

Cutubka 3aad: Caalamka iyo calmaaniyadda.

Cutubka 4aad: Hanaqaadkii maxaakiimta

Cutubka 5aad: Taangigii tigreega

KELMADA QORAAGA

Dulmanahaaan udoodaa.

Danyaartaa la jaal ahay.

Doqonkiyo damanahaan.

Danta guud usheegaa.

Wixii aniga iga dadan.

Rabbi baan udaaya.

Intaan dunida joogana.

Dastuurkaygu waa kaas.

CUTUBKA1AAD
QARAN MISE QABIIL

Cutubka koowad wuxuu tilmaamayaa qoraagu in qabyaaladu kareebtay asaageed umadaha kale bulshada soomalida.
tafaraaruq qabyaalad ka dhashay ayaa wiiqay wadajirkii umada soomaliyeed.

Brockman oo ah qoraaga buuga the british Somaliland ayaa 1912 safar kumarayey dhulka NFD wuxuu arkay koox soomali ah oo wadata safar oo nin walba awrkiisa hogaanka uhayo wax iskaashi ahna uuu kamuuqan. Brockman wuxuu weydiyey kaaliyihiisa oo kenyatti ah dadkani maxay yihiin?ninkii kenyattiga ahaa ayaa yiri “waa Soomaali ninkastana gaarkiis buu suldaan uyahay” brockman oo baarsi kusameeyey dhaqanka soomalida wuxu ku sheegay qoraal uu qoray in soomaalidu dabiiciyan qof kasta waa suldaan madaxbanaan.

Sida muuqata shacabka soomalida waxaa lagu tilmami karaa mid leh boqolaal hogaamiye beeleed oo midkasta u dhaqmo sidii dawlad madaxbanaan oo leh daqli, deegaan iyo xuduud ceel iyo carshin marka loo kuurgalo habdhaqanka beelaha soomaliyeed waxaa muuqata beelwalba inay tahay dawlad yar oo madaxbanaan ugaasku waa madexweyne, nabadoonadu waa wasiiro, culimadu waa gorsoolayaal, gaashaan qaadku waa ciidan meliteri, haweenku waa hay’addii

waxsoosaarka.sida qaaalibkana beelkasta waxay leedahay dastuur laga sooo minguuriyey shareecada islaamka iyo xeer soomaaliga.

Guud ahaan beelaha waxaa ka dhaxeeya xiriir diblomaasiyedeed oo ka curta guurka dhexmara labada beelood, iyo haweenka lakala guursaday ay yihiin danjirayaal adkeeya xirrirka labada beelood.

CUTUBKA 2AAD
XUDUNTA XASARADDA

Qoraagu wuxuu buugiisa ku sheegay cutubkiisa labaad xudunta xasaradaha somaliya inay ka dhex aloosantahay damaca mataanaha mudug.

Wuxuu tilmamay qoraagu in xasaradda labada beel ay soo bilamatay 1885 waqtigaas oo suldaan cali yusuf keenadiid uu bud dhiugay saldanadii hobyo,wxaa khilaaf xoogan dhexmaray dadkii deeganka iyo suldaankii oo markii danbe talyaanigu ka faaidaystay iskudirka labada beelood ee walalaha ah isuna adeegsaday, wuxuu qoraagu tilmamay in kahor gumeystuhu inta uusan imin inaysan jirin colaad buuran oo dhextaalay labada beelood ee walalaha ah.

CUTUBKA 3AAD
CAALAMKA IYO CALMAANIYADA

Cutubkan wuxuu qoraagu aragti dheer naga siinayaa barbilowgii ama soo biixtaankii calmaaniyada reer galbeedka, wuxuu tilmmamay qoraagu in ku dhow dhawr qarni inay jirtay loolan u dhaxeeya kaniisadaha reer galbeedka oo ay baadariyaashii xukamayeen iyo aqoonyahano philosopher ah, aqoonyahanadu waxay kaga adkaadeen baadariyaasha fikirka ay aminsanaayeen oo ah in diinta iyo dawlada la kala saaro fikradaas waxay aad uxogaysatay kacaankii warshadaha ee ingriska markii bilaamaday.

sidoo kale wuxuu qoraagu inoo timamay koox layiraahdo trinity oo rumeesan jiritaanka alle balse aysan aqoon ulaheen waxay ku cibadaystaan oo alle ku caabudaan.

CUTUBKA 4AAD
HANAQAAADKII MAXAAKIIMTA

Qoraagu wuxuu inoo ifiyey hanaqaadki maxaakiimta ee somaliya,sidoo kale wuuxuu inoo tilmamay kahor maxaakimta inay soomaliweyn ku xooganayd dariiqada/xerta kuwaasoo uqaybsama

1. Awaysiya oo asaasay sheikh aways dheere oo ku xoogan koonfurta soomaliya.
2. Sayliciya oo asaasay sheikh cabdirixmaan saylici oo kuxoogan waqooyiga soomaaliya.
3. Samatariya oo ku xoogan gobolada dhexe oo aasaaskeda laha sheikh cali samatar.
4. Axmediya oo ayagana usii kala baxa rashiidiya iyo saalaxiya.

Hogaankii maxaakimta wuxuu uqaybsnayeen labo gole oo kala ah;

Golaha fulinta

A. Sh.sharif sh.axmed (gudoomiye)
B. Cabdirihman maxamuud janaqow (g/x:1aad)
C. Cabdilqadir cali Cumar (g/k2aad)
D. Axmed cabdi godane(xooghayaha guud)

Golaha shuurada

E. Sh.xasan dahir aweys (gudoomiye)
F. Dr cumar imaan (kxg1aad)
G. Cabdulaahi asbero(kxg 2aaad)
H. Maxamed sh.Ibrahim suuleey(xooghaye)

Mudadii lixda bilowd ee maxaakimta shacabkii aad bay ugu riyaqeen waxqabadkoodii waxay taabe geliyeen maxaakimtu;-

A. Nadiifinta qashinka ee burburkii kadhashay.
B. Dayactirka wadooyinka
C. Yareynta tuugada.
D. Dib uhawlgalinta dekedii g.banadir.
E. Dib ucelintii hantidii shacabkii somaliyeed ee burburkii kadib.

Qaladaadkii maxaakimta

Wuxuu qoraagu xusay qaladaadkii maxaakimta haystay ee ay ka gudbiwayeen waxaa kamid ah;-

A. Maamul midaysan ma ayna leheen maxaakimta.
B. Aqqoon la'aan dhanka maamulka (administration).
C. Waxay diideen maxaakimtu inay hawlgaliyaan cxd ee dawladi siyad barre badalkii waxay hawl galiyeen dad aan aqoon duruqsan ulahayn hawlaha ciidanka.

D. Aqoon yari xaga meliteriga oo dad aan aqoon duruqsan uleheen xilka looma gacaabay.

CUTUBKA 5AAD
TAANGIGII TIGREEGA

Cutubka 5aad wuxuu qoraagu kaga hadlay dagaaladii ka dhexdhacay xukuumadii kumeelgarka ahayd iyo muqawimada maxaakimta wuxu qoraagu xusay in kabadan 10 kun oo qof inay kunafwayeen dagaal socday mudo ku dhow halbil kuna dhawacmeen tiro intaas kusadexjibarnta, wuxuu qoraagu xusay in ciidankii itopia ay ka geesteen xasuuq shacab koonfuta somaliya ciidankaasoo casuumitaan koodi lahaayen dawladii kumeelgarkaas ee xiligaas jirtay.

30/11/2006 melez zenawi wuxu shiriyey barlamankii ithopia waxay barlamankiisu umeelmariyeen go'aan ka gulufka meliteri ee ciidanka ethopia kugaleen soomaliya kudhawaad dhawr iyo tobonkun oo ciidanka meliteriga ethopia ayaa kasoo gudbay xad beenaadka ethopia ayagoo fariisimo kadhigtay magaalada baydhabo oo caasimad u aheed xoogagii dawladii kumeelgarka eexiligaas ciidankii ethopia waxy ka gacansiiyeen dawladii kumeelgaarka aheed inay dib boorka uga jafato viladii aboorku ka buuxsamay.

Ciidankii ethopia ee xamar qabsaday waxaa madex u ahaagabre dile oo ahaa talyaha ciidanka,gabresgaber oo ahaa ergeyga malez iyogabresalaase oo ahaa taliyihii nabadsugidda.

Riyadii melez zenawi

Qoraagu wuxuu ciwaan gaar ah ka dhigay riyadii iyo himilooyinkii melez uu kalaha dhulwaynaha soomaliya wuxuu qoraagu xusay in malez iyo tplf danaynayeen dawlad ay kor ka ilaashadaan oo ay kasameeyaan Somalia waxa uu qoraagu xusay in tplf ay faro gelin qaawan ku haysay somaliya iyo dawladihii kumeelgarka ahaa ee xiligaas jirtay.

- sidoo kale qoraagu wuxuu bidhamiyey in melez oo arday iyo siyaasi kasoo afalaxay jamacadii umada ee somaaliya bartayna dhaqanka somalida aadna u yaqaanay.
- Melez wuxuu ku haminayey inuu Somalia ku soo daro ama ka dhigo kililka 6aad ee ethopia balse ay ka hoos baxday inay somalidu yihiin dad qab leh oo taariikh facweyn kuleh dagaalada geeska.
- 27/11/2007 melez zenawi waxa uu si niyad jab ah ka horqiratyin cidankiisa ku fashilmeen inay nabad kuso dabalaan somaliya. Qoraagu wuxuu cutubkan ku xusay dagaaladii dhexmaray xabshida iyo somalida qarniyaal ka hor iyagoo faahfaahsan hadii aad danaynaysid fadlan akhri buuga taangigii tigreega.

GABAGABO

Si guud wuxuu qoraagu uga waramayaa dhibta ay leedahay dawlad la'aanta shacabka soomaliyeed ragaadisay iyo daganooyinka ay maaganyihiin shisheeyaha dalkeena damaca wayn kahaya,qoraagu wuxuu diirada saarayaa dawlada ethopia cadawada qotoda dheer naga dhaxeysa iyo damacooda ku aadan boobka dhulka somaliyeed.

wuxuu qoraagu aad ugu dheeraday dagaalkii ciidankii ethopia iyo kuwa taagerayaashii maxaakiimta ku dhexmaray magalada muqdisho oo ay khasaaro badan ka gaysteen sida uu tilmamayo qoraagu.

Ugu dambayn hadiii aadan akhrin buuga taangigii tigreega fadlan akhri si aad wax badan uga ogaato taarikhda dalka waxaana kugu la talinlahaa inaad u akhrisid si dagan oo ay cadifadi ku dheehneen.

DHAMAAD